

Xuquuqda aad leedahay iyo waajibaadka laguugu leeyahay - Somali

Dukumeentigaani wuxuu sharxayaa waxa adiga ama qof aad daryeesho, naga filan karo annaga iyo waxa aan kaa filayno markaad adeegsaneyso adeegyadeena.

Maxaad naga filan kartaa

Ixtiraam

Waxaad xaq u leedahay in:

- lagula dhaqmo shaqsi ahaan si xushmad iyo sharaf leh
- la aqoonsado dhaqankaaga, aqoonsigaaga, waxa aad aaminsan tahay iyo xulashadaada

Macluumaad

Waxaad xaq u leedahay in:

- aad heshid macluumaad cad oo ku saabsan xaaladdaada, faa'iidooyinka iyo halista suurtagalka ah ee ka dhalan kara baaritaanada iyo daaweynta kala duwan, si aad u bixisid fasax ku saleysan xog dhamaystiran ood heshay.
- hesho macluumaad ku saabsan adeegyada, mudada/waqtiga la sugayo iyo kharashyada
- lagu siiyo caawimaad markii aad u baahato, si ay kaaga caawiso inaad fahamto una isticmaasho macluumaadka caafimaadka
- aad codsatid helitaanka macluumaadkaaga caafimaad
- lagu sheego haddii wax khaldameen, sida ay wax u dheceen, sida ay kuu saameyn karto adiga iyo waxa la qabanayo si loo ilaaliyo daryeelka

Iskaashi

Waxaad xaq u leedahay in:

- aad weydiiso su'aalo kana qayb gasho wada hadal furan oo daacad ah
- Go'aanno la gaartid daryeel bixiyahaaga, illaa heerka aad doorato oo aad awoodid
- aad ka qeyb galisid dadka aad dooneysid in laga qeyb galiyo xagga qorsheynta iyo go'aan gaarista

Amniga

Waxaad xaq u leedahay in:

- aad hesho daryeel caafimaad oo ammaan ah isla markaasna tayo sare leh oo buuxiya heerarka qaranka
- lagugu xanaaneeyo jawi ku dareensiinaya inaad xaalad ammaan ku jirtid

Helitaanka

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyo daryeel caafimaad iyo daaweyn buuxisa baahiyahaaga. Waxaan bixinaa daryeel dowladeed ama mid gaar loo leeyahay. Daryeelka dadweynaha waxaa bixiya dowladda. Haddii aad leedahay caymis caafimaad oo gaar loo leeyahay, waxaad dooran kartaa daryeel caafimaad oo gaar loo leeyahay.

Asturnaanta/baraaqfasiga

Waxaad xaq u leedahay in lagu tixgeliyo arimahaaga gaarka ah isla markaana macluumaadka adiga kugu saabsan iyo caafimaadkaaga laguugu xafido oo aan la faafin.



Haddii aad u baahan tahay turjubaan, fadlan nala soo socodsii: 131 450

Fikrad wadaag

Waxaad xaq u leedahay in:

- aad soo gudbisid fikradaada ama sameyso cabasho iyadoon saameyn ku yeelanayn sida laguula dhaqmayo
- loo xaliyo tabashooyinkaaga si furan oo waqtigeeda ku habboon
- aad nala wadaagtid khibradaada kana qeybqaadatid horumarinta tayada daryeelka iyo adeegyada caafimaadka

Waxa adiga aan kaa filaneyno

Ixtiraam

Waxaan kaa filaynaa inaad ula dhaqanto shaqaalaheena, bukaanka, daryeelayaasha, qoysaska iyo booqdayaasha si xushmad iyo sharaf leh.

Macluumaad

Fadlan noo sheeg wax kasta oo aad ka ogtahay caafimaadkaaga. Tan waxaa ka mid noqon kara:

- Taariikhdaada caafimaad
- Dawooyin kasta oo aad qaadato
- Wixii howlo daaweeyn kale oo dheeraad ah
- Taageerada qoyska iyo bulshada
- Sida ay naftaadu dareemeyso
- Hab nololeedkaaga iyo caqiidooyinka dhaqankaaga.

Haddii aadan naftaada u hadli karin, waxaad weydiisan kartaa qof inuu ku caawiyo.

Iskaashi

Fadlan kaqeybqaado daaweyntaada. Tan macnaheedu waxa weeye weydiinta su'aalaha, is wareysi ku saabsan fursadaha kala duwan iyo xulashada ku saabsan daaweyntaada iyo daryeelkaaga.

Amniga

Waxaan kaa fileynaa inaad si taxaddar leh ula dhaqanto xarumahayaga oo aad nadaafaddooda iyo ammaankoodaba ilaaliso. Waxaan kaa codsaneynaa inaad raacdo xeerarka iyo tilmaamaha. Waxaan kaa codsaneynaa inaad sigaar cabin inta aad joogto mid ka mid ah xarumahayada.

Asturnaanta/Baraayfasiga

Waxaan rajeyneynaa inaad ixtiraami doonto asturnaanta/baraayfasiga dadka kale.

Wax aad ka welwelsan tahay ma jiraan?

Waxaan jeclaan lahayn fursad aan ku xallino wixii walaac ah ee aad qabtid sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah. Haddii aadan ku qanacsanayn khibradaada Monash Health, fadlan nala soo hadal::

Tallaabada koowaad: La hadal shaqaalaha adiga ku daryeelaya

Tallaabada labaad: Codso inaad la hadasho shaqaalaha mas'uulka ka ah

Tallaabada seddexaad: Haddii welwelkaaga aan la xallin, ama haddii aadan ku kalsoonayn inaad la hadasho shaqaalaha waaxda, waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah Isuduwayaasha Xiriirka Bukaanka:

Monash Medical Centre	9594 2702	Casey Hospital	8768 1465
Monash Children's Hospital	9594 2702	Cranbourne Centre	9554 8078
Dandenong Hospital	9554 8078	Mental Health Program	9554 9237




Haddii aad u baahan tahay turjubaan, fadlan nala soo socodsii: 131 450

Moorabbin Hospital	9928 8584	Monash Health Community	9554 8078
Kingston Centre	9265 1356	Community Oral	9554 8078



Haddii kale, waad booqan kartaa boggeena internet ka adoo nala wadaagaya fikirkaaga:

www.monashhealth.org



Ama qoraal noogu soo dir:
Complaints and Compliments
Monash Health Locked Bag 29
Clayton South VIC 3169

Haddii aan awoodi kari weynay inaan xallino cabashadaada, waxaad la xiriiri kartaa Wakiilka Cabashooyinka Caafimaadka:

Level 26, 570 Bourke Street
Melbourne VIC 3000
Telephone: **1300 582 113**
Website: www.hcc.vic.gov.au



Haddii aad u baahan tahay turjubaan, fadlan nala soo socodsii: 131 450